

Waxa ka cusub ee laga dhafay waxbarashada shaqsi ahaaneed: Wasiir Nicolaides

Febraayo 26, 2025-ka [Weydiimaha Warbaahinta](#)

Wasiirka waxbarashada Demetrios Nicolaides ayaa soo saaray bayaankan soo socda ee ku saabsan waxa ku soo kordhay amarrada wasaarada ee xulashooyinka waxa laga dhafay waxbarashada shaqsi ahaaneed:

"Waxaan u heellannahay inaan hubinno in arday kasta ee gobolka ku nool sii wado inuu helo waxbarasho heer-caalami ah, xitaa inta lagu guda jiro shaqo-joojinta iminkan socota.

Guddiyada dugsiyadu waxay leeyihiin kalsoonida Waxbarashada Alberta si ay u gaaraan go'aannada la xiriira dejinta barnaamijyada waxbarashada ee heer deegaan, maadaama aan aaminsannahay inay si fiican u yaqaanaan baahiyaha ardaydooda iyo dugsiyadooda. Tan waxaa qayb ka ah qorshayaasha ay ku sii soconeyso waxbarashada xilliyada ay jiraan shaqo joojin ama shaqaalo yari.

"Si gacan looga geysto hubinta badqabka iyo fayo qabka ardayda iyo shaqaalaha xilligii ay jirtay shaqa joojintii dhawayd, Waaxda Dugsiyada Dadweynaha ee Edmonton ayaa codsatay, waxaana la siiyay, amar wasaaradeed oo ah in laga dhaafo ikhtiyaarka waxbarashada si shaqsi ahaaneed ay uga soo qayb galaan ardayda uu taageerayo barnaamijka kaaliyaha waxbarashada. Guddiga Waxbarashada ee Fort McMurray Roman Catholic, Dugsiga Degmada Fort McMurray iyo Waaxda Dugsiga Sturgeon ayaa sidoo kale dhamaantood codsaday waxaana la siiyay fursad lamid ah oo ay ardayda uga dhafi karaan in ay si shaqsi ahaaneed uu xadiran waxbarashada.

"Xukun maxkamadeed oo dhawaan la soo saaray ayaa iftiimiyay baahida loo qabo in la ballaariyo amar kasta ee looga dhafayo ardayda in ay si shaqsi ahaaneed uu soo xadiran waxbarashada si loo hubiyo in agabka la qiimeeyo oo loo qaybiyo si loo hubiyo in *dhammaan ardayda la tixgeliyo*, iyada oo aan loo eegeynin in ay u baahan yihiin taageerada kaaliyaha waxbarashada iyo in kale.

“Annagu si dhab ah ayaanu u qaadanay go’aanka maxkamadda, waxaanna si deg-deg ah aan wax uga beddeli doonnaa amarrada wasaaradda. Waxbarashada ardayda ay si shakhsi ahaaneed uu xadiran waxay muhiim u tahay guusha ardayda iyo fayo qabkoodaa maskaxeed waxaana dawladda Alberta ay sii wadi doontaa la shaqaynta dadka ka socda dugsiyada bahwadaagta la ah si ay u sii wadaan waxbarashada ardayda ay si shakhsi ahaaneed uu xadiran inta lagu jiro shaqo joojinta xilligan socota.

"Waxaan qaadnay tallaabooyin aan ku beddeleyno dhammaan amarrada wasaaradda ee wax looga dhafayo in si shaqsi ahaaneed ardayda ay uu xadiran waxbarashada inagoo ku beddeleyna amarro cusub, oo ay qayb ka yihiin shuruudaha iyo xeeladaha, kuwaas oo hagi doona maamullada dugsiyada inay:

- Qiimeeyaan oo u qaybiyaan dhammaan agabyada iyadoo la tixgelinayo dhammaan ardayda oo laga qayb gelinaayo qaab loo wada dhan yahay, siman oo caddaalad ah.
- Samee dadaal macquul ah si
 - Aad uu siiso fursado waxbarasho oo ay si shaqsiyan uu xadiran dhammaan ardayda.
 - U oggolow ardaygu inuu sii wato isla koorsooyinkiisa iyo barnaamijkiisa waxbarasho haddii uu qaabkiisa waxbarasho uu u beddesho mida uu ku qaadan karo isagoo jooga gurigiisa.
- Si joogto ah ula xiriir waalidiinta iyo ardayda.

“Dawladda Alberta waxa ay ka filaysaa guddiyada dugsiyadu inay si joogto ah oo qeexan ula xiriiraan ardayda iyo waalidiinta inta lagu guda jiro shaqo joojinta socota, waxaanna ka fileynaa inay nala wadaagaan tafaasiisha qorshahooda bulshooyinka dugsiyadooda sida ugu dhaqsiyaha badan ee ay awoodaan.

"Nidaamka waxbarashada Alberta ee K-12 waxaa loo dejiyay si ardaydeena loo siiyo waxbarasho heer-caalami ah ee taageerta waxbarashada, fayo qabka shucuureed iyo jireed, inago isla markaasina ka sii shaqeyneeyno sidii aan uu gaari lahayn hadfkan."

Su'aalaha warbaahinta

Garrett Koehler

780-554-5777

Xoghayaha Warfaafinta, Wasaaradda Waxbarashada